

Refugee  
Rights  

---

Turkey

Mülteci  
Hakları  

---

Merkezi

**XAQ U LAAHANSHAHA WAXBARASHO**  
Qofka Doonaya Magan Gelyada Turkiga

SU'ALLO IYO JAWAABO

XUQUUQDA QAXOOTIGA EE TURKIGA: LA TALINTA XAGA SHARCIGA IYO KAALMADA QAXOOTIG OO LACAG LA,AAN AH

Türkiye'de Uluslararası Koruma Arayan Kişiler İçin

**EĞİTİM HAKKI**

# Waxaan Doonayaa Ilaalinta Caalamiga ee turkiga, Caruurtaydu Xaq ma u leeyihin inay waxbarasho helaan?

Is diiwan gelintada hay,adda dawlad ee DGMM waxay muhiim u tahay xaq u lahaansha wax barasho ee turkiga. Iyadoo waraysigaga Hay.ada dawlad raacayso, waxa lagu siin doona kaadhka aqoonsiga ilaalinta caalamiga ah. Dukumentiga waa lacag la,aan waxaa la socoda Kaardha numberka ajaanibta ee ka bilowda 99. Nambarkaas wax u muhiim kugu yahay helitankaga waxbarasho, sida waxbarasho hoose iyo mid sarre iyo sida kale barashada luuqada turkigaga iyo farsamada gacanta.

# Waxan haysta caruur da,doodu iskuul hoos tahay, sidee baan ugu diri kara iskuulka?

Iyadoo la eegayo nidamka u dejisan iyo xaalkoda, lab ama dheddiga, Waxaa khasab ah in caruurtadu dhamaantod ay helaan waxbarasho dalka turkigaga ah. Waxbarashada lacag la,aanta ee turkiga waxay u qaybsan tahay 12 sanadood waxayna u sii kala baxaan. 4 sano ee ugu horaysa ee iskuulka hoose (1aad, 2aad, 3aad,4aad), 4 sano oo iskool dhex ah oo ah( 5aad,6aad,7aad iyo 8aad) iyo afar sanadood oo Iskuul Sarre ah (9aad ,10aad,11aad iyo 12aad). Luuqada ay waxbarashad lagu dhiganay waa turki.

# Sidee baan uga Diiwangelin gelin kara caruurtayda iskuulada dawlada ee waajibka ah ee caruurtayd dhiganayso? Ma inaan lacag bixiyo baa? Caruurtayduse ma helaysa diblooma?

Waxaad ka diiwan gelin kartaa caruurtada iskuulada dawlada ee ku yaal meeshaad iska soo diiwan gelisay ee aad kaadhkeed aqoonsiga haysato. Isdiiwan gelinta iyo qaabka lo marayoba waxaa go,aankeeda iska leh laanta waxbarashad ee gobolkaas. Sida daraadeed Waxaa muhiim ah inaad tusto dukumentiyad iyo shahaadooyinka waxbarasho ee ilmahaaga hadii aad haysato.

Goboladda ama tuulooyinka qaybtood gudidooda waxbarasho ay waxay ka qaadi karaan imixanaad,Imtixanadkani wuxu noqon kara mid afka ah iyo mid qoraal ah ama labadaba. Qiimayntani waxay tusaysa heerka waxbarasho ee ilmahaaga.

Si kastaba ha noqotee, Hadii aad dhamays tirin isdiiwan gelintada ama aan laguba siin kaadhka aqoonsiga ajaanibta, sidoo kale waad ilmahaaga ka diiwan gelin karta iskuulada dawlada. Hadaba madama aadan haysan dukumintiyada waxaa ilmahaaga loo aqoonsanay arday kumeel gaadh ah ama marti ah. Waxaase suuragal ah in in laga bedelo hadhow marka aad heshaan Kaadhka aqoonsiga ee ajaanibta.

Waxbarashad iskoolada dawladu waa lacag la,aan, luuqada wax lagu barayo iskoolka waa manhajka turkiga, Ardayda buuxisa shuruudaha iskoolada dawlada waxay kaloo heli karaan diblooma.

## Hadii aan rabo Dugsi Sarre, Maxansamaynayaa?

Caruuraha dhamays tiray dugsi dhexe ilaa galaaska 8 ayaa waxay heli karaan dugsi sare. Sida daraadeed waxaa muhim ah inaad keento waraaqahagi iskoolka aad iyo shahaadooyinkaga ama dibloomada. Hadii aadan haysan dukumentiyaas waa inaad u tagtaa guuddida waxbarasho ee gobolkaa si ay kugu qiimeeyan heerka waxbarasho . qiimaynta waxay noqon kartaa mid afka ama qoraal ah ama labadaba. Qiimaynta waxay ku siinaysa heerka waxbarasho aad la qabsan karto.

# Qofka doonayaa ilaalinta caalamiga ah ee turkiga ma iska diiwan gelin kara jamaacadaha Turkigaga?

Shuruudaha ugu horeeya ee helitanka jamacadaha turkigaa waxay tahay inaad ku dhamaysay dugsi hoos, mid dhex iyo mid sareba ee dalka turkigaga. Shuuradah waxa buuxin kara ardayda ku dhamaysay iskuulada sare ee dawlad ee Turkiga.

Dhaman ardayda ajaanbita ah ee rabta inay iska diiwan geliso jamaacadaha turkigaga waa in maraan imtixaanadka ardayda ajaanibta ah ee lo yaqaan(YOS) oo ay jamaacaduhu maamulaan, waana in ay ku baasan imtixanadkaas. Sida kale waxaad bixinaysa lacagta is diiwan gelinta si aad u gasho imtixanka. Intaas waxa dheer jaamacaduhu waxay ikhtiyaar u leeyihin inay ka bandhigan shuruudo hore leh oo ku saabsan waxbarashadii hore. Marka waxaanu kugula talinaynaa inaad la tashato waaxaha ardayda ajaanibta ee websayda jamacadaha si aad xog dheerad ah uga hesho ogeysiisyada iyo shuruudahaba.

Sidoo kale waxaa muhiim ah inaad ogaato inaad iska xidhi karto ilaalintad caalmiga ah si aad isaga diiwan geliso jamaacadaha turkiga. Hadii jamacaadad tahay gobol aan ahayn gobolkad ku qoran tahay, waa inaad waraaq u qorta hay'aada dawlad ee iska diwna gelisay DGMM oo aad codsataa bedel, fadlan ku lifaaq waraaqaha jamacadaa isku diwan gelisay codsiga. Fadlan waa inaad maskaxda ku haysaa in ciwaankaga is bedelayo madama ad iska bedeshay gobolkaagi hore. Waa inaad la xidhiidha hay'ada dawlad DGMM ee gobolka cusub laguug qoray 20 casho gudohood. Hadii aad la xiriirin waxaad khatar ugu jirta in lagu ganaaxo.

## Waxaa Rabaa inaan barto af Turkiga, Yaa i caawin kara?

Dhamaan caruuraha, dadka waweyn iyo kuwa yar yarba ee rabaa inay bartaan luuqada turkiga waxay tegi karaa xarumaha waxbarashe ee loo yaqaan( Halk Egitim Merkezi). Goobahani waxay bixiyaan koorsooyin lacag la'aan ah waxaana lagaga baahan yahay keliyaa inaad tusto Kaadhkaga Aqoonisga ajaanibta si aad isga diiwan geliso goobahaas.

Waxaa intas dheer,

Waxaa jira Uruuro dhowr ah oo bulshada Ra'iydka ah oo bixiya koorsooyin af turki ah ee gobolka aad ku qoran tahay.

# Waxaa Rabaa inaan helo farsamada gacanta, Fursadahayga maxay yihin?

Waxaad tegi kartaa goobaha dawlad ee waxbarashada si aad uga hesho farsamad gacanta. Koorsooyinka waa lacag la'aan. Sidaas daradeed xarun kasta ee waxbarashad farsamad gacanta iyaga go'aamin doont koorxada ay idin siinayan sanadki iyo kuwa cusub ee so socodaba.waxan kugu talainayna inad tagto xarumaha dawlad ee waxbarsho si aad u ogaato koorshoyinka aad heli karto. Faadlan waxad ogaata inaad laga baahan yahay markast inaad tuso kaadhka aqoonsiga si aad uga faaidaysto koorshoyinka.

Sidoo kale waxaa jira Uruuro bulshada Ra'iydka oo bixiyaa koorsooyin iyo xirfado iyo farsamad gacanta . waad na soo wici karta si aad u ogaato kooroyinka sida loga heli karo gobolkaga.

## Xuquuqda Qaxootiga ee Turkiga:

Meel kasta oo Turkiga aad ka joogtid, hadii aad rabto inad ka faaidaysto adeegyada xaga sharciga ah iyo la adeegyad la talinta. Ku soo dhowow inaad soo booqatid xafiskeena ama nala soo xidhiidh tilifoonkyaga ama faxska dhamaan maalmaha asbuuca laga bilaabo 10:00bila 17:00 galabnimo. Dhamaan adeegyadadu waa bila lacag.



Dr. Refik Saydam Cad. Dilber Apt. No: 39 Daire: 11 Kat: 4

Şişhane, Beyoğlu - İstanbul



+90 212 292 48 30



+90 212 292 48 33



info@mhd.org.tr





# Mülteci Hakları Merkezi

## Refugee Rights Turkey

 Dr. Refik Saydam Cad. Dilber Apt. No: 39 Daire: 11 Kat: 4

Şişhane, Beyoğlu - İstanbul

 +90 212 292 48 30

 +90 212 292 48 33

 [info@mhd.org.tr](mailto:info@mhd.org.tr)

[www.mhd.org.tr](http://www.mhd.org.tr)

Xoogahan waxaa soo **saaray** **Hay,ada Xuquuqada Qaxootiga ee Turkiga** iya-doo la kaashanaysa hayada degan maraykane ee **Isku xidhka Midnimad qaxootiga iyo Golaha dhajka ee qaxootiga** oo ay tageerayso **Wasaarad Arimaha dibada maraykan, Maktabada shacabka, Qaxootiga iyo Socodaalka**



Refugee Rights Turkey



Refugee Solidarity Network



US Department of State  
Bureau of Population,  
Refugees, and Migration